WARSIDAHA BILLAHA AH

JUS



Sannad Tacliimeed Cusub, fursado cusub

Bishii Sebtembar 2026, Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed waxay qabatay, ka qayb gashay, isla markaana martigelisay hawlo kala duwan oo la xiriira tacliinta, cilmi baarista, hal abuurka, horumarinta shaqaalaha, tababarrada, iskaashiga hay'adaha dowladda iyo jaamacadaha, waxbarashada dhijitaalka ah, caafimaadka, culuumta badda iyo horumarinta xirfadaha ardayda.

Warbixintan billaha ah waxay soo koobaysaa hawlihii iyo dhacdooyinkii muhiimka ahaa ee Jaamacadda intii lagu jiray bisha Sebtembar 2026.



Sanad tacliimeedka

4,287

Arday ayaa isu diiwaangelisay

400+

Arday uu ABUUR taageerayo

80

Saacadahatababarka dhimirka

50+

Tirada Macalimiinta helay Waxbarashada dhijitaalka

SHEEKADA UGU WEYN

Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud oo Daah-furay Sannad-tacliimeedka 2026/2027 ee Jaamacadda Ummadda

Madaxweynaha ayaa sidoo kale daah-furay Hindisaha ABUUR iyo laba xarumood oo caafimaad, xariggana ka jaray dhismayaal cusub, isla markaana dhagax-dhigay xarumaha Hal-abuurka & Cilmi-baarista iyo Guriga Martida Jaamacadda

Muqdisho, 12 Sebtembar 2026 - Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud, ayaa daah-furay sannad-tacliimeedka 2026/2027 ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, munaasabad ballaaran oo lagu qabtay Masraxa Shariif Saalax ee xarunta KM4 ee Jaamacadda.

Munaasabadda waxaa ka soo qaybgalay Wasiirka Waxbarashada, Wasiirka Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, Guddoomiye Ku-xigeenka IBS Bank, Guddoomiyaha Midowga Jaamacadaha, madaxda iyo bahda waxbarashada, bah-wadaagta, marti-sharaf, macallimiin iyo ardayda Jaamacadda.

Horumarka Dalka iyo Tayeynta Waxbarashada

Madaxweynaha JFS, Dr. Xasan Sheekh Maxamuud, oo khudbad ka jeediyay munaasabadda, ayaa tilmaamay in horumarka Soomaaliya uu si weyn ugu xiran yahay tayeynta waxbarashada, kobcinta aqoonta iyo maalgelinta dhallinyarada.

Madaxweynuhu wuxuu xusay in jaamacaduhu ay door muhiim ah ku leeyihiin diyaarinta jiil aqoon iyo xirfad u leh hoggaaminta dalka iyo ka qaybqaadashada horumarkiisa.

Daah-furka Hindisaha ABUUR

Intii ay socotay munaasabadda, Madaxweynaha ayaa daah-furay Hindisaha ABUUR (Hindisaha ABUUR), oo ah barnaamij loogu talagalay kobcinta hal-abuurka, curinta iyo xirfadaha ganacsi ee ardayda Jaamacadda.

Barnaamijku wuxuu sannadkasta taageeridoonaa in ka badan 400 arday, gaar ahaan ardayda sannadka ugu dambeeya iyo kuwa qalin-jabiyay, si ay fikradahooda ugu beddelaan ganacsiyo, shaqo-abuur iyo mashaariic la maalgelin karo.

Hindisaha ABUUR wuxuu socon doonaa muddo 12 bilood ah. Lixda bilood ee ugu horreeya, ardaydu waxay qaadan doonaan tababar ku saabsan hal abuurka iyo ganacsiga, halka lixda bilood ee xiga ay heli doonaan taageero, hagid iyo kobcin joogto ah si loo horumariyo ganacsiyada ay bilaabaan.

Xarig-jarka: Dhismayaasha Cusub ee Kulliyadaha

Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa xarigga ka jaray dhismayaasha cusub ee Kulliyadaha Culuumta Caafimaadka iyo Luqadaha, kuwaas oo qayb ka ah qorshaha Jaamacaddu ku horumarinayso kaabayaasheeda waxbarasho iyo jawiga waxbarasho ee ardayda.

Daah-furka Xarunta Gurmadka Degdegga ah iyo Daryeelka Xaaladaha Halista ah

Waxaa munaasabadda lagu daah-furay Xarunta Gurmadka Degdegga ah iyo Daryeelka Xaaladaha Halista ah (SECCTC).

Xaruntaan oo ah xarun tababar qaran ayaa loogu talagalay in ay xoojiso xirfadaha dhakhaatiirta iyo shaqaalaha caafimaadka ee dhinacyada gurmadka degdegga ah, daryeelka xaaladaha halista ah iyo daryeelka dhaawacyada.

Xaruntu ayaa bixin doontaa shahaadooyin caalami ah oo ay ka mid yihiin BLS, ATLS, iyo ACLS waxayna leedahay aqoonsiga hay'adaha ASHI, ACS iyo AHA.

SHEEKADA UGU WEYN | SII SOCOTA

Caafimaadka, hal-abuurka iyo kaabayaasha

Daah-furka Xarunta Guddiga Carabta ee Takhasusyada Caafimaadka

Waxaa sidoo kale la daah-furay Xarunta Guddiga Caafimaadka Arrimaha Carabta (Guddiga Carabta ee Takhasusyada Caafimaadka), oo ah xarun isku xiraysa Soomaaliya iyo Golaha Guddiga Carabta ee Takhasusyada Caafimaadka, kaas oo bixiya shahaadooyinka iyo tababarrada takhasuska sare ee caafimaadka.

Xaruntan oo ay iska kaashanayaan Wasaaradda Caafimaadka iyo Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ayaa dhakhaatiirta Soomaaliyeed u suurtagelin doonta inay takhasus sare oo caalami ah ku qaataan dalkooda, taas oo yareynaysa baahida ay u qabaan inay dibadda ugu safraan takhasusyadaas.

Dhagax-dhigga Xarunta Hal-abuurka iyo Cilmi-baarista

Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa sidoo kale dhagax-dhigay Dhismaha Hal-abuurka iyo Cilmi-baarista ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed.

Dhismahan waxaa qorshuhu yahay inuu ka koobnaado shaybaar ballaaran oo sayniska iyo caafimaadka ah, maktabad weyn oo leh qayb dhijitaal ah, xarun hal-abuur oo dhammaystiran iyo xafiisyo ay isticmaali doonaan xarumaha cilmi-baarista Jaamacadda.

Xaruntan ayaa la filayaa inay xoojiso awoodda Jaamacadda ee dhinacyada cilmi-baarista, hal-abuurka iyo horumarinta aqoonta.



Dhagax-dhigga Guriga Martida Jaamacadda

Madaxweynaha Xasan ayaa sidoo kale dhagax-dhigay Guriga Martida Jaamacadda Ummadda, oo noqon doona dhisme afar dabaq ah oo loogu talagalay martigelinta khubarada dibadda ka imaanaya iyo martida Jaamacadda.

Guriga Martida ayaa halkii mar marrti gelin kara 70 bare ama marti, wuxuuna gacan ka gaysan doonaa taageerada tacliinta, cilmi-baarista iyo martigelinta khubarada iyo bah wadaagta Jaamacadda.

Dhismayaashan cusubayaa qaybka ah dadaallada lagu tayeynayo waxbarashada sare, tababarrada caafimaadka, cilmi-baarista iyo kaabayaasha Jaamacadda.

Guddoomiyaha JUS oo u Mahadceliyay Madaxweynaha iyo Bah-wadaagta

Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed, ayaa u mahadceliyay Madaxweynaha Jamhuuriyadda ka soo qaybgalkiisa iyo daah-furka sannad-tacliimeedka iyo mashaariicda horumarineed.

Guddoomiyuhu wuxuu xusay in taageerada Madaxweynaha iyo muhiimadda uu siinayo waxbarashada sare, cilmi-baarista, hal-abuurka iyo maalgelinta dhallinyarada Soomaaliyeed ay dhiirrigelin wayn u tahay Jaamacadda iyo dadaalladeeda ku aaddan tayaynta waxbarashada sare ee dalka.

Dr. Maxamed ayaa sidoo kale mahad iyo qaddarin u jeediyay madaxda qaranka, mas'uuliyiinta dowladda, madaxda iyo bahda waxbarashada, bah-wadaagta, marti-sharafta iyo dhammaan ka soo qaybgalayaashii munaasabadda.

Wuxuu si gaar ah ugu mahadceliyay IBS Bank iyo dhammaan bahdii ka qaybqaadatay hirgelinta Hindisaha ABUUR.

Daah furka sannad-tacliimeedka **2026/2027** iyo mashaariicda cusub ayaa qayb ka ah dadaallada Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ee lagu xoojinayo tayada waxbarashada, cilmi-baarista, hal-abuurka, caafimaadka, ganacsiga iyo hal-abuurka ardayda, iyo horumarinta kaabayaasha Jaamacadda.

SHEEKADA UGU WEYN | SAWIRRADA

Sannad-tacliimeedka 2026/2027

Masawiro kamid ah daah-furka,xarig-jaridda iyo dhagax-dhigga mashaariicda cusub.

















Munaasabaddii Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, Muqdisho, 12 Sebtembar 2026.

SHEEKADA UGU WEYN | SAWIRRADA

Sannad-tacliimeedka 2026/2027

Masawiro ka mid ah daah-furka, xarig-jaridda iyo dhagax-dhigga mashaariicda cusub.















Munaasabaddii Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, Muqdisho, 12 Sebtembar 2026.

QORSHAYNTA IYO HORUMARINTA

Shirka Sanadlaha ah ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed oo Lagu Soo Gabagabeeyay Muqdisho

1-3 Sebtembar 2026



Muqdisho, 3 Sebtembar 2026 - Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ayaa Shirka Sanadlaha ah oo socday muddo saddex maalin ah, 1-3 Sebtembar 2026 ku qabatay deegaanka Jazeera, kaas oo ay ka qayb galeen Maamulka Sare ee Jaamacadda, xubno ka tirsan Golaha Tacliinta iyo xubnaha ka shaqaynayay Tiirarka Istraatiijiyada.

Shirka Sanadlaha ah ayaa diiradda loogu saaray dib u eegista Qorshaha Istiraatiijiga ah Jaamacadda ee shanta sano **2025-2030**, iyadoo si qoto dheer looga dooday mudnaanta, jihada horumarineed iyo qorshayaasha Jaamacadda ee sannadaha soo socda.

Maalintii koowaad ee shirka, **Golaha Tacliinta** ayaa si gaar ah uga hadlay xeerarka waxbarashada, siyaasadaha Jaamacadda iyo diyaar garowga sannad-waxbarasheedka cusub, iyadoo la eegayay sidii loo xaqiijin lahaa habsami u socodka iyo tayada howlaha tacliinta.

Labadii maalmood ee xigay waxaa si gaar ah loogu dooday dib u eegista Qorshaha Shanta Sano ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (2025-2030), iyadoo la qiimeeyay jihada istiraatiijiyadeed, mudnaanta horumarineed iyo yoolalka Jaamacadda.

Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare, oo maalintii labaad ee shirka ka qaybgalay, ayaa khudbad uu ka jeediyay kaga hadlay muhiimadda istiraatiijiyadeed ee waxbarashada farsamada iyo xirfadaha.

Wasiirku wuxuu tilmaamay doorka ay waxbarashada xirfadeed ku leedahay kobcinta aqoonta iyo xirfadaha dhallinyarada, diyaarinta shaqaale xirfad leh oo ka qaybqaata horumarka dhaqaalaha dalka iyo bulshada.

Shirka ayaa xoojinaya dadaallada Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ee ku aaddan sare u qaadista tayada waxbarashada, cilmi-baarista, hal abuurka iyo horumarinta Jaamacadda, iyadoo la dejinayo istraatiijiyadda hagaysa jihada iyo mudnaanta horumarineed ee shanta sano ee soo socota.







SHIRKA SANNADLAHA AH | SAWIRRADA

Wada-tashi lagu hagayo mustaqbalka





















Masawirada laga soo qaaday Shirka Sannadlaha ah ee JUS, 1-3 Sebtembar 2026.

XIRFADAHA ARDAYDA IYO MANAAHIJTA

7 Sebtembar 2026

Jaamacadda iyo Wasaaradda Batroolka oo Tababar u Soo Gabagabeeyey Ardayda Culuumta Dhulka



Jaamacadda Ummadda, iyadoo kaashanaysa Wasaaradda Batroolka iyo Kheyraadka Macdanta ee JFS, ayaa soo gabagabeysay tababar socday muddo laba maalmood ah oo loo qabtay 40 arday oo ka tirsan Dufcadda 5aad ee Waaxda Culuumta Dhulka.

Tababarka oo diiradda lagu saaray sidii ardayda barnaamijyo ka qayb qaadanaya kobcinta aqoonta iyo xirfadaha la xiriira cilmiga dhulka, sahminta shidaalka & gaaska, iyo baarista kheyraadka macdanta. Tababarka waxaa bixinayay khubaro ka socotay Wasaaradda iyaga oo ardayda la wadaagay aqoon iyo waayo aragnimadooda taas oo gacan ka geysanaysa isku xirka aqoonta Jaamacadda lagu dhigtay iyo xirfadaha looga baahan yahay goobaha shaqada.

Tababarku wuxuu ardayda fursad u siiyay inay faham dheeraad ah ka helaan fursadaha iyo baahiyaha xirfadeed ee qaybaha shidaalka, gaaska iyo macdanta. Iskaashigani wuxuu qayb ka yahay dadaallada lagu isku xirayo waxbarashada jaamacadeed iyo khibradda shaqo, laguna diyaarinayo arday aqoon iyo xirfado u leh horumarinta iyo maareynta kheyraadka dabiiciga ah ee Soomaaliya.

8 Sebtembar 2026

Daahfurka Wajiga Koowaad ee Tababarka Dib u eegista Manaahijta



Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed, ayaa Muqdisho ka furay Wajiga Koowaad ee Tababarka Dib-u-eegista Manaahijta Jaamacadda.

Guddoomiyuhu ayaa xusay muhiimadda dib u eegista iyo casriyeynta manaahijta si ay ula jaanqaadaan horumarka aqoonta, isbeddellada waxbarashada iyo baahiyaha dunida casriga ah.

Guddoomiye Ku xigeenka Arrimaha Tacliinta, Prof. Cabdirisaaq Xaashi, ayaa isna carrabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay in si joogto ah dib u eegis loogu sameeyo manaahijta, si loo horumariyo tayada waxbarashada loona waafajiyo aqoonta cusub iyo baahiyaha isbeddelaya ee bulshada iyo dunida.

Tababarka waxaa ka qaybgalay dhammaan kulliyadaha Jaamacadda, waxaana diiradda lagu saaray hababka dib ueegista iyo horumarinta manaahijta, nuxurka koorsooyinka, yoolalka waxbarasho, hababka waxbaridda iyo qiimeynta.

Waxaa tababarka soo qabanqaabiyey Xafiiska Guddoomiye Ku-xigeenka Arrimaha Tacliinta iyo Agaasinka Manaahijta iyo Tababarrada Macallimiinta.

6 Sebtembar 2026

Naadiga Qalinjebiyayaasha Jaamacadda oo Martigeliyay Barnaamijka Soo Laabashada Qalinjabiyaasha

Xafiiska Qalinjabiyaasha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ayaa martigeliyay SNU Alumni Homecoming Program, oo loogu talagalay dib u soo laabashada qalinjabiyaashii hore ee Jaamacaddooda. Barnaamijka waxaa ka qayb galay Prof. Yaxye Caamir, Prof. Yusuf Maxamed Ali iyo Prof. Muqtar Calas, oo ka mid ah aqoonyahannadii ka qalinjabiyay JUS ka hor burburkii dowladdii dhexe ee dalka. Qalinjabiyaasha waxaa soo dhaweeyay Raktarka , Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed, waxayna bahda Jaamacadda la wadaageen xusuustii iyo waaya-aragnimadoodii. Barnaamijku wuxuu xoojinayaa isku xirka jiilasha iyo xiriirka ay la leeyihiin qalinjabiyaasheeda Jaamacadda.



CAAFIMAADKA IYO CADDAALADDA

8 Sebtembar 2026

Xuska Maalinta Caalamiga ah ee physiotherapy 2026 oo lagu qabtay Jaamacadda

Jaamacadda UmmaddaSoomaaliyeed iyo Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ayaa si rasmi ah u soo gabagabeeyey munaasabadda Maalinta Caalamiga ah ee physiotherapy ga 2026, oo lagu qabtay Muqdisho, iyada oo ay ka soo qayb galeen masuuliyiin iyo madax kala duwan oo ka socda Jaamacadda, bahda caafimaadka dalka, hay'adaha caalamiga ah, xirfadlayaasha caafimaadka, xirfadlayaasha daaweynta jirka iyo aqoonyahanno kala duwan.

Maalintan ayaa diiradda lagu saaray muhiimadda physiotherapy ga iyo doorka uu ka qaato caafimaadka, dhaqdhaqaaqa jirka, baxnaaninta bukaannada, ka hortagga iyo maaraynta xaaladaha caafimaad.

Waxaa sidoo kale lagu soo bandhigay muhiimadda kor u qaadista wacyiga bulshada ee adeegyada daaweynta jirka iyo xoojinta aqoonta iyo xirfadaha xirfadlayaasha ka shaqeeya qaybtaan.



9 Sebtembar 2026

Jaamacadda iyo Wasaaradda Caddaaladda oo Kala Saxiixday Heshiis Lagu Hirgelinayo Barnaamij Darajada Labaad ah

Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed iyo Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa kala saxiixday heshiis lagu hirgelinayo Barnaamij Waxbarasho oo Darajada Labaad (Darajada Labaad) ah.



Heshiiska oo qayb ka ah wejiga labaad ee Barnaamijka Maamulka Dadweynaha Talyaaniga iyo Soomaaliya (PAIS), ayaa diiradda lagu saarayaa horumarinta aqoonta, xirfadaha iyo awoodda shaqaalaha garsoorka iyo caddaaladda. Sidoo kale waxa uu xoojinayaa iskaashiga labada dhinac.

Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed, ayaa heshiiska u saxiixay dhanka Jaamacadda, halka dhanka Wasaaradda uu u saxiixay Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Mudane Faysal Aadan Xasan.

Hirgelinta Barnaamijka Maamulka Dadweynaha ayaa gacan ka geysan doona diyaarinta shaqaale leh aqoon sare iyo xirfado ku habboon baahiyaha hay'adaha garsoorka iyo caddaaladda ee dalka.

14 Sebtembar 2026

Machadka Luuqadda Ingiriisiga ee Jaamacadda oo Soo Gabagabeeyay Tartanka Kulliyadaha 2026

Machadka Luuqadda Ingiriisiga (ELI) ayaa qabtay gabagabada Tartanka Kulliyadaha ee ELI 2026, iyadoo arday ka kala socday kulliyadaha Jaamacadda ay ku tartameen saddex qaybood oo kala ah Barnaamijyada Codka, Doodda iyo Hadal-jeedinta.

Gabagabada ayaa soo gunaanadday diyaargarow iyo tartamo socday intii lagu jiray xilli-tacliimeedka, iyadoo ardaydu heleen fursad ay ku muujiyaan xirfadahooda Af-Ingiriisiga, kalsoonidooda, hal-abuurkooda iyo awoodda gudbinta fikradaha. Tartanka ayaa sidoo kale ardayda u abuuray jawi dhiirrigelinaya tartan aqooneed, wada-shaqayn, fikirka naqdiyeed iyo horumarinta xirfadaha isgaarsiinta.

WAXBARASHADA DHIJITAALKA AH

JUS oo Macallimiinta u Qabatay Tababar ku Saabsan Nidaamka Maareynta Waxbarashada (LMS)

13-14 Sebtembar 2026

13–14 Sebtembar 2026 — Xafiiska Waxbarashada Elektarooniga ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (JUS), oo kaashanaya Xarunta Cilmi-baarista iyo Waxbarashada ee Tiknoolajiyaddu Horumarisay (CTRL), ayaa macallimiinta Jaamacadda u qabtay tababar laba maalmood ah oo ku saabsan Nidaamka Maareynta Waxbarashada (LMS).

Tababarka ayaa diiradda lagu saaray maareynta koorsooyinka, agabka waxbarashada, hawlaha iyo qiimeynta ardayda, xiriirka macallinka iyo ardayga iyo la socodka horumarka waxbarasho. Macallimiinta ayaa tijaabiyay nidaamka, iyadoo tababarku qayb ka yahay dadaallada Jaamacadda ee ee lagu horumarinayo waxbarashada dhijitaalka ah iyo tayada waxbarashada.



Macallimiinta oo tababar iyo tijaabo ku samaynaya nidaamka LMS.

15 Sebtembar 2026

JUS iyo Jaamacadda Hormuud oo ka Wada Hadlay Xoojinta Iskaashiga Tacliinta Sare



Muuqaal laga soo qaaday hawsha lagu sheegay maqaalkan.

Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed iyo Jaamacadda Hormuud ayaa ka wada hadlay sidii loo dhisi lahaa iskaashi wax-ku-ool ah oo labada jaamacadood ay ku mideynayaan aqoontooda, khibraddooda iyo awooddooda, si ay u xoojiyaan tacliinta dalka iyo mustaqbalka jiilka soo socda ee Soomaaliyeed.

Labada jaamacadood waxay isku waafaqeen in si faahfaahsan looga shaqeeyo sidii loo horumarin lahaa loona xoojin lahaa tacliinta sare ee dalka.

Sidoo kale, waxay isku waafaqeen in laga shaqeeyo diyaarinta iyo kala saxiixashada heshiisyo la xiriira qaybaha kala duwan ee tacliinta sare, gaar ahaan tacliinta, cilmi-baarista iyo tababarka macallimiinta.

Iskaashigan ayaa la filayaa inuu abuuro fursado lagu wadaago khibradaha iyo aqoonta, lagu kobciyo awoodda macallimiinta iyo cilmi-baarayaasha, laguna dhiirrigeliyo barnaamijyo cilmi-baariseed iyo tacliimeed oo wadajir ah.

SHAQAALAHA IYO MAAMULKA TACLIINTA

22 Sebtembar 2026

JUS oo Qabatay Shirka Sanadlaha ah ee Shaqaalaha



Muuqaal laga soo qaaday hawsha lagu sheegay maqaalkan.

Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ayaa qabatay Shirka Sanadlaha ah ee Shaqaalaha Jaamacadda, kaas oo sannadkan diiradda lagu saaray Anshaxa Wanaagsan ee Shaqada iyo Ilaalinta Amaanada.

Shirka ayaa muhiimad gaar ah siiyay kor u qaadista masuuliyadda, hufnaanta, daacadnimada iyo dhaqanka wanaagsan ee goobta shaqada, si loo xoojiyo adeegga iyo horumarka Jaamacadda.

Waxaa la adkeeyay muhiimadda ay leedahay in shaqaaluhu ilaaliyaan masuuliyadda iyo amaanada loo igmaday, isla markaana shaqadooda u gutaan si hufan, daacadnimo leh, kuna salaysan anshax iyo wada-shaqayn wanaagsan.

Shirka ayaa sidoo kale fursad u ahaa xoojinta wada-shaqaynta qaybaha kala duwan ee Jaamacadda iyo dhiirrigelinta dhaqan shaqo oo ku dhisan isla-xisaabtan, xilkasnimo, wadajir iyo u adeegidda bulshada.

23 Sebtembar 2026

JUS oo Qabatay Shirka Golaha Tacliinta





Muuqaal laga soo qaaday hawsha lagu sheegay maqaalkan.

Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ayaa qabatay Shirka Golaha Tacliinta, kaas oo looga hadlay ajandayaal muhiim u ah horumarinta iyo tayeynta howlaha tacliinta ee Jaamacadda.

Shirka waxaa si gaar ah looga hadlay barnaamijka Aasaaska Waxbarashada, iyadoo laga wada hadlay habraacyada iyo arrimaha muhiimka u ah hirgelintiisa.

Golaha ayaa sidoo kale ka hadlay Jadwalka Tacliinta sannad-tacliimeedka 2026-2027, xeer-hoosaadka imtixaannada iyo habraacyadiisa, Qaab-dhismeedka Tacliinta Kulliyadaha, dib-u-eegista manaahijta, waaxyaha cusub iyo arrimo kale oo la xiriira horumarinta nidaamka tacliinta Jaamacadda.

Shirku wuxuu qayb ka yahay dadaallada lagu horumarinayo nidaamka tacliinta, tayada waxbarashada, casriyeynta manaahijta iyo dejinta habraacyo iyo halbeegyo mideysan.

GARGAARKA IYO TAYADA IMTIXAANAADKA

23 Sebtembar 2026

Ardayda Jaamacadda oo loo Qabtay Tababar ku Saabsan Gargaarka Degdegga ah

XaruntaTababarka Gurmadka Degdegga ah iyo Daryeelka Xaaladaha Halista ah (SECCTC), oo kaashanaya Qaybta Gargaarka Degdegga ah ee Xafiiska Arrimaha Bulshada ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, ayaa qabtay tababar ku saabsan Gargaarka Degdegga ah .

Tababarka waxaa loo qabtay arday ka kala socday kulliyadaha kala duwan ee Jaamacadda, iyadoo lagu barayay aqoonta iyo xirfadaha aasaasiga ah ee muhiimka u ah bixinta gargaarka degdegga ah marka ay dhacaan xaaladaha degdegga ah.

Ardayda ayaa la baray hababka aasaasiga ah ee loo qiimeeyo xaaladda qofka u baahan gargaar, tallaabooyinka degdegga ah ee la qaadayo iyo sida loo bixiyo caawimaad bilow ah ilaa qofku helo daryeel caafimaad oo dhammaystiran.

Ujeeddadu waxay ahayd in ardayda la siiyo aqoon iyo xirfado ay si sax ah oo degdeg ah ugu caawin karaan qofka xaalad degdeg ah ku jira.

Jaamacaddu waxay u mahadcelisay dhammaan ardayda ka qaybqaadatay tababarka, macallimiinta, tababarayaasha iyo maamulka ka shaqeeyay hirgelinta barnaamijka.

24 Sebtembar 2026

Tababar ku Saabsan Horumarinta Hawlaha Imtixaanaadka iyo Halbeegyadiisa



Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, Prof. Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed, ayaa Muqdisho ka furay tababar ku saabsan Horumarinta Hawlaha Imtixaanaadka iyo Halbeegyadooda.

Tababarka ayaa diiradda lagu saaray tayeynta iyo hufnaanta imtixaanaadka, qiimeynta aqoonta ardayda, horumarinta habraacyada imtixaanaadka iyo ilaalinta halbeegyada tayada.

Waxaa tababarka ka qaybgalay Xafiiska Diiwaanka Guud, Hormuudyada Kulliyadaha iyo saraakiisha ka shaqeeya howlaha imtixaanaadka.

Tababarka waxaa bixinayay Guddoomiye Ku-xigeenka Arrimaha Tacliinta, Prof. Cabdirisaaq Cabdullaahi Xaashi, isaga oo ka qaybgalayaasha la wadaagay hababka iyo halbeegyada muhiimka u ah diyaarinta, maamulka, kormeerka iyo qiimeynta imtixaanaadka.

Tababarkani wuxuu qayb ka yahay dadaallada Jaamacadda ee lagu horumarinayo tayada tacliinta iyo hufnaanta maamulka imtixaanaadka.

CAAFIMAADKA DHIMIRKA IYO CILMI-BAARISTA

27 Sebtembar 2026

JUS oo Daahfurtay Tababar Tababarayaal oo ku Saabsan Caafimaadka Dhimirka

Tababarkaoo kakooban 80 saacadoodayaa lagu diyaarinayaa shaqaale caafimaad oo awood u leh inay aqoonta caafimaadka dhimirka u sii gudbiyaan shaqaalaha kale ee caafimaadka

27 Sebtembar 2026: Guddoomiye Ku-xigeenka Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (JUS) ee Qorshaynta iyo Horumarinta, Prof. Fu'aad Mire, ayaa furay Tababar Tababarayaal (ToT) oo ku saabsan caafimaadka dhimirka, kaas oo ay ka qaybgalayaan shaqaale caafimaad oo ka kala socda Wasaaradda Caafimaadka iyo wasaaradaha caafimaadka ee dowlad-goboleedyada.

Ka qaybgalayaasha tababarka ayaa qaadan doona 80 saacadood oo tababar ah, iyadoo ujeeddadu tahay in la diyaariyo tababarayaal leh aqoon iyo xirfado ay ugu sii gudbin karaan shaqaalaha kale ee caafimaadka aqoonta iyo hababka la xiriira caafimaadka dhimirka.

Furitaanka tababarka waxaa sidoo kale ka hadlay Madaxa Caafimaadka Dhimirka ee Wasaaradda Caafimaadka, Ustaad Zeynab Ahmed Noor, iyo Marwa Lindasay Massman, oo ka tirsan qaybta Soomaaliya ee Safaaradda Kanada.

Mas'uuliyiintii ka qaybgalay furitaanka ayaa adkeeyay muhiimadda caafimaadka dhimirka iyo baahida loo qabo in la kordhiyo awoodda shaqaalaha caafimaadka ee dhinacan. Waxay sidoo kale tilmaameen in tababarkani qayb muhiim ah ka qaadan doono sidii adeegyada caafimaadka dhimirka loogu dari lahaa adeegyada caafimaadka aasaasiga ah, si bulshada loogu fududeeyo helitaanka adeegyo caafimaad oo isku dhafan.

Tababarkani wuxuu qayb ka yahay mashruuc cilmi-baaris oo iskaashi ah oo ay hormuud ka yihiin Prof. Mohamed Ibrahim oo ka tirsan Jaamacadda British Columbia iyo Ustaad Abdulwahab M. Salad, oo ah cilmi-baare ka tirsan Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed.

Mashruuca iyo tababarkuba waxay qayb ka yihiin dadaallada lagu xoojinayo awoodda shaqaalaha caafimaadka, cilmi-baarista iyo iskaashiga hay'adaha, iyadoo si gaar ah mudnaan loo siinayo horumarinta adeegyada caafimaadka dhimirka iyo ku dhex-daristooda nidaamka adeegyada caafimaadka aasaasiga ah.

28 Sebtembar 2026

JUS oo ka Qayb Gashay Daahfurka Mashruuca ACT-PREP ee Kampala, Uganda





Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ayaa ka qayb gashay munaasabadda daahfurka Mashruuca ACT-PREP, oo ka dhacday magaalada Kampala, Uganda.

Mashruuca ACT-PREP, oo ay maalgelinayaan EDCTP3 iyo Midowga Yurub, wuxuu ujeeddadiisu tahay xoojinta awoodda cilmi-baarista ee u diyaargarowga xaaladaha degdegga ah iyo ka jawaabistooda.

Mashruucu wuxuu sidoo kale muhiimad siinayaa horumarinta awoodda cilmi-baarayaasha, xoojinta iskaashiga hay'adaha cilmi-baarista iyo dhisidda nidaamyo cilmiyeed oo taageera u diyaargarowga iyo ka jawaabista xaaladaha degdegga ah.

Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed waxay mashruucan kala shaqaynaysaa jaamacado iyo hay'ado cilmi-baaris oo ka kala socda Afrika iyo Yurub, kuwaas oo ay hoggaaminayso Jaamacadda Makerere.

Munaasabadda daahfurka ayaa bah-wadaagta mashruuca fursad u siisay inay isla meel dhigaan qorshayaasha fulinta, iskaashiga cilmi-baarista iyo hawlaha muhiimka ah ee lagu xaqiijinayo himilooyinka ACT-PREP.

ARDAYDA CUSUB IYO CULUUMTA BADDA

30 Sebtembar 2026

4,287 Arday oo isu Diiwaangelisay Imtixaanka Oggolaanshaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed

4,287

Ardayisudiiwaangelisay imtixaanka oggolaanshaha

Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ayaa soo gabagabeysay diiwaangelinta ardayda u tartamaysa gelitaanka Jaamacadda, iyadoo 4,279 arday ay isu diiwaangeliyeen Imtixaanka Oggolaanshaha.

Diiwaangelinta ayaa socotay muddo bil ah, waxaana si toos ah looga waday xarumaha Jaamacadda ee Muqdisho, Caabudwaaq iyo Badhan.

Sannadkii labaad oo xiriir ah, Jaamacaddu waxay ardayda u suurtagelisay inay sidoo kale si dhijitaal ah isu diiwaangeliyaan, taas oo fursad siisay ardayda ku sugan gobollada kala duwan ee dalka.

Ardayda ayaa Imtixaanka Oggolaanshaha ku geli doonta xarumo ay Jaamacaddu u astaysay magaalooyinka Muqdisho, Caabudwaaq, Badhan, Beledweyne, Baydhabo, Kismaayo iyo Garoowe.

Dhammaan ardayda ku guulaysata imtixaanka waxay waxbarashadooda ka bilaabi doonaan xarumaha ay Jaamacaddu ku shaqayso ee saddexda magaalo ee Muqdisho, Caabudwaaq iyo Badhan.

Imtixaanka Oggolaanshaha Jaamacadda ayaa la geli doonaa 1-da Oktoobar 2026, halka natiijada la qorsheeyay in la shaaciyo 19-ka Oktoobar 2026.

Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed waxay dhammaan ardayda Soomaaliyeed ee u fariisanaysa imtixaanka u rajaynaysaa guul iyo natiijo wanaagsan.

30 Sebtembar 2026

Jaamacadda oo Qaabishay Wafdi ka Socday IGAD iyo Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah



Muuqaal laga soo qaaday hawsha lagu sheegay maqaalkan.

Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ayaa soo dhaweysay wafdi ka socday Urur Goboleedka IGAD, oo ay wehliyeen Agaasimayaal ka socday Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah.

Wafdiga waxaa qaabilay Guddoomiye Ku-xigeenka Qorsheynta iyo Horumarinta JUS, Prof. Dr. Fu'aad Mire Xasan, iyo howlwadeennada Kulliyadda Sayniska, Qeybta Culuumta Badda, oo uu hoggaaminayay Hormuudka Kulliyadda, Prof. Dr. Hussein Bashir.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xogta iyo digniinaha hore ee badda iyo xeebaha , wadaagista xogta, cilmi-baarista iyo xoojinta iskaashiga dhinacyada badda iyo kalluumeysiga Soomaaliya.

Waxaa sidoo kale laga wada hadlay muhiimadda helitaanka, ururinta iyo wadaagista xogta la xiriirta xaaladaha badda iyo xeebaha, iyo doorka Jaamacaddu ka qaadan karto soo saarista cilmi-baaris iyo aqoon taageerta fahamka iyo maareynta kheyraadka badda iyo xeebaha.

Kulankan ayaa qayb ka ah Mashruuca BE-PROSPER ee IGAD, kaas oo diiradda saaraya xoojinta iskaashiga, xog-wadaagga iyo horumarinta aqoonta la xiriirta badda iyo xeebaha.

Kulanku wuxuu qayb ka yahay dadaallada Jaamacadda ee lagu ballaarinayo iskaashiga hay'adaha qaranka, kuwa gobolka iyo kuwa caalamiga ah, gaar ahaan dhinacyada cilmi-baarista, culuumta badda, kalluumeysiga iyo horumarinta dhaqaalaha buluugga ah.

GUNAANAD IYO XIRIIR

Aqoon. Cilmi-baaris. Adeeg bulsho.

Xafiiska Cilmi-baarista iyo Hal-abuurka oo Xoojiyay Hawlaha Cilmi-baarista iyo Hal-abuurka

Sebtembar 2026 — Xafiiska Cilmi-baarista iyo Hal-abuurka ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (JUS) ayaa bishan sii xoojiyay hawlaha la xiriira cilmi-baarista, hal-abuurka, ganacsiga ardayda iyo horumarinta iskaashiyada, iyadoo sidoo kale la sii horumariyay nidaamyada maamulka cilmi-baarista iyo deeqaha.

Xafiisku wuxuu sii waday isku-duwidda iyo dabagalka hawlaha cilmi-baarista ee kulliyadaha, waaxyaha iyo xarumaha cilmi-baarista, isagoo xoogga saaray diiwaangelinta wax-soo-saarka cilmi-baarista, daabacaadaha, mashaariicda socda iyo soo-jeedimaha cilmi-baarista.

188 Codsi oo loo Gudbiyay ABUUR Initiative, 131 Ardayna loo Xulay Cohort 1

Sebtembar 2026 — Barnaamijka ABUUR Initiative ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ayaa helay 188 codsi, iyadoo 131 arday loo xulay Cohort 1, kuwaas oo 50 ka mid ahi yihiin gabdho. Wacyigelinta barnaamijka ayaa gaartay 11 ka mid ah 12-ka kulliyadood ee Jaamacadda.

ABUUR Initiative waxaa loogu talagalay horumarinta hal-abuurka, curinta iyo ganacsiga ardayda, iyadoo ardayda la siinayo tababar iyo hagid ku saabsan horumarinta fikradaha ganacsi, qorsheynta ganacsiga, suuq-geynta, maamulka maaliyadda, hal-abuurka dhijitaalka ah, adeegsiga mas’uuliyadda leh ee AI, hantida aqooneed, horumarinta MVP-yada iyo diyaarinta bandhigyada ganacsi.

JUS oo Xoojinaysa Nidaamka Maamulka Cilmi-baarista iyo Deeqaha

Sebtembar 2026 Xafiiska Cilmi-baarista iyo Hal-abuurka ayaa sii waday horumarinta Research Grant Management Policy (ReGMaP), oo loogu talagalay in Jaamacaddu yeelato hannaan cad oo hufan oo lagu maareeyo deeqaha iyo mashaariicda cilmi-baarista.

Shaqadan ayaa diiradda saaraysa hagaajinta habraacyada codsashada iyo maaraynta deeqaha, xoojinta isla-xisaabtanka, kordhinta fursadaha maalgelinta iyo horumarinta dabagalka mashaariicda. Waxaa sidoo kale la sii diyaarinayaa aasaaska Research Information Management and Data Analytics, si JUS u yeelato nidaam mideysan oo lagu kaydiyo, lagu maareeyo laguna falanqeeyo xogta cilmi-baarista.

JUS oo Dhisaysa Awoodda Tababarayaasha Hal-abuurka iyo Ganacsiga

Sebtembar 2026 — Shan SIYB Trainers of Trainers (ToTs) ayaa qayb ka noqday diyaarinta iyo hirgelinta ABUUR Initiative, iyagoo taageeraya tababarka iyo hagidda ardayda ka qaybgalaysa barnaamijka.

Xafiiska Cilmi-baarista iyo Hal-abuurka ayaa sidoo kale mudnaan siinaya dhisidda awoodda dhinacyada Innovation Management, Mentorship and Coaching, Intellectual Property, Digital Innovation, Responsible AI iyo horumarinta ganacsiyada bilowga ah.

Xogta xiriirka: bogga rasmiga ah ee Jaamacadda, snu.edu.so/contact-us/.

GUNAANAD IYO XIRIIR

Aqoon. Cilmi-baaris. Adeeg bulsho.

Bisha Sebtembar 2026 waxay Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed u ahayd bil ay ka qabsoomeen hawlo ballaaran oo taabanaya dhinacyada muhiimka ah ee horumarinta Jaamacadda.

Hawlaha bishan waxay isugu jireen horumarinta tacliinta iyo manaahijta, tababarka macallimiinta iyo shaqaalaha, hirgelinta waxbarashada dhijitaalka ah, cilmi-baarista iyo hal-abuurka, horumarinta xirfadaha ardayda, caafimaadka, culuumta dhulka iyo kheyraadka dabiiciga ah, iskaashiga jaamacadaha iyo hay'adaha dowladda, culuumta badda iyo dhaqaalaha buluugga ah, iyo diyaarinta Imtixaanka Oggolaanshaha ardayda cusub.

Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed waxay sii waddaa dadaallada lagu xaqiijinayo waxbarasho tayo leh, cilmi-baaris wax-ku-ool ah, horumarinta awoodda shaqaalaha iyo ardayda, iyo iskaashi heer qaran, gobol iyo caalami ah oo taageeraya horumarka waxbarashada sare iyo adeegga bulshada Soomaaliyeed.

Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed - Aqoon, Cilmi-baaris iyo Adeeg Bulsho.

LA XIRIIR JAAMACADDA

Xafiiska Guddoomiyaha

Xarunta Shabeelle, Xamarweyne, Muqdisho

jus@snu.edu.so

Xafiiska Xeriirka iyo Maamulka Mareegaha

Xarunta KM4, Degmada Waaberi, Muqdisho

+252 771433333 | communicatiosn@snu.edu.so

La soco wararka Jaamacadda: snu.edu.so

Xogta xiriirka: bogga rasmiga ah ee Jaamacadda, snu.edu.so/contact-us/.